# Miyaad uur leedahey oo magangelyo codsaneysaa?

Macluumaad loogu talogalay qofka uurka leh ee magangelyada Norway ka codsanaya



## Marka aad uur leedahey

Waxaad xaq u leedahey la socod dhakhtarka joogtada ah iyo ummuliso lacag la'aan ah ee halka aad deggan tahey.

## Marka aad umusho

Waa inaad ilmahaaga diiwaangeliso. Ilmaha Norway ku dhashey si toos ah uma helayo oggolaasho deggenaansho ama dhalashada noorwiijiga.

- Haddii aad xero qaxooti deggan tahey, waa inaad caddeynta dhalmada ee isbitaalku ku siiyey aad u dhiibto shaqaalaha xerada.

  Xerada qaxootiga ayaa u sii diraysa xafiiska UDI ee gobolka, markaas ayey UDI diiwaangelineysaa codsiga ilmaha.

- Haddii aanad xero qaxooti degganeyn, waxaad warqadda caddeynta dhalmada ee isbitaalku ku siiyey aad u geynaysaa booliiska meesha aad deggantahey. Booliiska ayaa markaa diiwaangelinaya codsiga ilmaha.

Dhammaan carruurta Norway ku dhalata, waxey xaq u leeyihiin la socodka xarunta caafimaadka.



**Ma u baahan tahey talo intaa ka badan?** La hadal adeegga talobixinta UDI **23 35 16 00.**

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqda adeegga caafimaadka:** La xidhiidh rugta caafimaadka ee halka aad deggan tahey.

UDI Utlendingsdirektoratet Norwegian Directorate of Immigration

UTLENDINGSNEMNDA UNE

POLITIET POLITIETS UTLENDINGSENHET